# Hannaanka Go'aannada Shaqo ee Naafada Horumarineed (DD)

Jaantusyada ku jira caawinta shaqadan waxay ka caawin doonaan Isu-duweyaasha Adeegga inay go'aamiyaan adeegyada shaqo ee ugu habboon, haddii ay jiraan, marka loo eego doorbidyada shaqo iyo awoodaha uu hadda leeyahay ka-qaybgaluhu.

## I. Go'aaminta Adeeg Shaqo

A. Jaantuskan u adeegso sidii tilmaame go'aaminaya adeegyada HCBS ee ugu fiican ka-qaybgalaha.

KA BILOOW HALKAAN




## II. Shaqo Taageero Leh

A. Marka la go'aamiyo in Shaqo Taageero Leh ay tahay adeegga ugu habboon, tallaabada xigta waa in la go'aansado nooca:

1. Shaqo Taageero Leh oo Qof-qof ah ama
2. Shaqo Taageero Leh oo La Socod Joogto ah.

B. Farqiga ugu weyn wuxuu ku jiraa heerka taageero ee ka-qaybgaluhu u baahan yahay si uu u dhammeeyo hawlaha shaqada.

| Shaqo Taageero Leh | |
|---|---|
| Taageerada iyo kormeerka joogto ah | Shakhsi ah |
| Ka-qaybgaluhu wuxuu u baahan yahay caawimaad goos-goos ah/waqtiyo gaara ama taageero aad u yar si uu u barto hawl/xirfad shaqo oo cusub. | Ka-qaybgalahu wuxuu u baahan yahay caawimaad dhow oo joogto ah ama taageero inta uu shaqada ku jiro oo dhan. |

C. Haddii aad rabto faahfaahin dheeraad ah, ka eeg soo koobidda adeegyada ee bogga guud ee DHHS.

## III. Hannaanka Dib-u-habaynta Shaqo-xirfadeed ee Habka Shaqaalaysiinta ee Taageersan

A. Marka kooxda PCP ay ku heshiiyaan in VR ay tahay xulashada ugu fiican ee socdaalka shaqo ee ka-qaybgalaha, sii wad adigoo adeegsanaya jaantusyada socodka ee ku jira caawintan shaqo.

B. Bogagga soo socda waxa lagu sharxayaa doorarka iyo mas’uuliyadaha SC, La-taliyaha VR, Bixiyeyaasha Adeegga, iyo ka-qaybgalaha oo ah kan ugu muhiimsan.

# Wajiga 1-aad:
# Gudbinta la-taliyaha Dib-u-habaynta Shaqo-xirfadeed VR - Codsiga la-taliyaha Dib-u-habaynta Shaqo-xirfadeed VR - Qorshaha Shaqo-shakhsiyeed



## Wajiga 2-aad:
## Marxaladaha VR

| Ka qaybqaataha | La-taliyaha Dib-u-habaynta Shaqo-xirfadeed VR | Adeeg bixiyaha | Isuduwaha Adeegga |
|---|---|---|---|
| Waxeey la shaqeeyaan VR iyo Bixiyaha Adeegga si loo gaaro yoolka shaqo ee ka-qaybgalaha. | Bixiyaa cusboonaysiin/warbixin no horumar ah oo loo gudbiyo SC, wuxuuna ka qaybgalaa kulamada PCP si uu uga caawiyo qorshaynta shaqo. | Siiyaa warbixinno bille ah La-taliyaha VR oo ku saabsan horumarka ka-qaybgalaha. (maalgelin VR) | Waxay ku casuumaan bixiyaha adeegga iyo La-taliyaha VR kulamada PCP si ay u bixiyaan cusboonaysiin, uga wada hadlaan horumarka/qorshaha ka-bixidda adeegga, iyo inay keenaan dukumentiyada taageeraya ee khuseeya. Waxay cusbooneysiisaa PCP-ga. |

## Wajiga 3-aad:
## Oggolaanshaha Adeegyada Shaqo Taageero Leh

